Socialstyrelsen

# Macluumaad kugu socda adigaaga loo fidinayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’

Daryeel waafaqsan LRV

Adigaaga ka yar 18 sano ee hela daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’ waxaa jira buug yare gooni ah oo laguugu tala galay.

Waxaa faafintan ilaalinaya xeerka milkiyadda fikirka. Haddii wax laga soo xigto
waa in la sheegaa isha wax laga soo qaatay. Si muuqaallada iyo sawirrada loo isticmaalo, waxaa loo baahanyahay in oggolaasho la heysto.

Faafintu waxay ku jirtaa iyadoo pdf ah barta intarnetka ee Guddiga Adeegga Bulshada.
Haddii nagala soo dalbado waan soo saari karnaa faafin qaab ahaan loogu tala galay dadka naafada ah. Su’aalaha ku aaddan qaababka la kala dooran karo
u dir alternativaformat@socialstyrelsen.se.

ISBN: 978-91-7555-637-6

Nambarka nuqulka: 2024-9-9203


Lagu faafiyay: www.socialstyrelsen.se, Septembar 2025

# Tusmada qoraalka

| | |
|---|---|
| Waxaad xaq u leedahay daryeel wanaagsan | 4 |
| Yaa go'aaminaya inta la ii daryeeli doono si waafaqsan LRV? | 8 |
| Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad | 11 |
| Xuquuqda qaarkeed waa la xaddidi karaa | 17 |
| Telefoon, kombuyuutar iyo warqado | 17 |
| Shaqaaluhu way baari karaan alaabtaada | 18 |
| Booqasho | 19 |
| Tallaabooyin khasab ah | 21 |
| Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato | 21 |
| Haddii aadan qanacsaneyn ama aad su'aalo qabtid | 21 |
| Qaamuuska iyo soo gaabinta erayada | 21 |
| Tix-raacyada | 21 |

# Waxaad xaq u leedahay daryeel wanaagsan

Daryeelku waa inuu ahaadaa mid aamin kuu ah adiga iyo dadka kale oo dhanba. Daryeelka waa in la bixiyaa iyadoo la ixtiraamayo qiimaha siman ee dadka oo dhan iyo sharafta qofka gaarka ah.  Shaqaaluhu waa in ay leeyihiin waxbarasho sax ah iyo hawlkarnimo xirfadeed.




## Waa maxay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’.

In qofka loo daryeelo si waafaqsan Xeerka daryeelidda dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’ (LRV) waxay ka dhigantahay in taqtari ama maxkamadi ay go’aamiso in si khasab ah laguu daryeelo iyadoo laga duulayo sharciyada Xeerka daryeelidda dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’. Ujeeddada daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' waa in qofka laga daweeyo xaaladaha la xiriira maskaxda, la yareeyo khatarta ku noqoshada dembiyada, lana siiyo qofka fursad uu dib ugula laabto bulshada.

## Goormeebaa laygu wareejin karaa daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'?

Daryeelka waafaqsan LRV waxaa lagu siin karaa haddii aad tahay:

- qof go'aan maxkamadeed ka dib loo wareejiyay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'
- qof la qabtay, la xiray ama ku jira xarun loogu talagalay baarista dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la',
- qof la geliyay ama la geyn doono xabsiga ciidamada asluubta.

Shuruudaha ay khasab tahay in ay buuxsamaan:

- Waa inaad qabto isku buuqsanaan daran oo xagga maskaxda ah.
- Waa inaad afar iyo labaatanka saacba u baahan tahay daryeel caafimaad oo xagga maskaxda ah.
- Waa inaad ka soo horjeesatay daryeel aad u baahan tahay.

Haddii go'aan maxkamadeed ka dib laguugu wareejiyay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', labada shardi ee ugu horreeya oo uu wehliyo xukunku ayaa ku filan si laguu daryeelo. Adigaaga la qabtay, la xiray, lagu hayo xarun loogu talagalay baarista dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', ama xabsi ku jira ama la geyn doono xabsiga ciidamada asluubta waa in xitaa shardiga seddaxaad u buuxsamaa.

# Yaa go'aaminaya inta la ii daryeeli doono si waafaqsan LRV?

Cidda go'aamineysa inaad daryeel hesho iyo goorta daryeelku dhammaan doono waxay ku xiran tahay xaaladaada.

## Adigaaga lagu wareejiyay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'

Haddii aad gashay dembi ciqaabtiisu noqon lahayd xabsi oo aad qabtid isku buuqsanaan daran oo xagga maskaxda ah waxay maxkamaaddu kuu wareejin kartaa daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'. Waxay taasi ku qoran tahay xeerka ciqaabta (BRB). Daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' wuxuu ku billaabmayaa waax xiran.

Xukunka ugu horreeya wuxuu shaqeynayaa ugu badnaan afar bil. Haddii ay maxkamaddu markaas ka dib go'aamiso in daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' uu sii socdo waa la dheereyn karaa ugu badnaan lixdi bilba hal mar. Wax xad ah ma laha inta jeer ee ay maxkamaddu dheereyn karo daryeelka.

Maxkamaddu way go'aamin kartaa in laguugu daryeelo daryeelka furan ee dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', marka aad buuxiso shuruudaha taas khuseeya. Madaxa taqtarka sare ay codsanaya daryeelka furan ee dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'. Waxay taasi ka dhigantahay inaadan u baahneyn inaad isbitaalka joogto habeen iyo maalinba ilaa inta aad raaceyso shuruudaha gaarka ah ee ay maxkamaddu go’aamiso. Waxay kuwaasi noqon karaan shuruudo ay ka mid yihiin tusaale ahaan inaad qaadato dawo go'an ama ka qeyb qaadato daweyn. Maxkamaddu way u xilsaari kartaa madaxa taqtarka sare in uu go'aamiyo shuruudahaas. Haddii aadan raacin shuruudaha gaarka ah ee daryeelka furan waxaa mar kale laguugu soo celin kartaa daryeelka xiran.

## Goormuu dhammaanayaa daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'?

Waxaa lagu wareejin karaa daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', oo leh ama aan lahayn eegitaan gaar ah oo bixitaan.

Haddii laguugu xukumay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' **oo aan lahayn baaritaan gaar ah oo bixitaan** waa inuu taqtarku mar walba qiimeeyo haddii labada shardi ee daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' ay ku khuseyaan. Haddii aysan taas sameynin laguma sii daryeeli doono.

Haddii laguugu xukumay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' **oo leh eegitaan gaar ah oo bixitaan** waa maxkamadda cidda go'aamineysa in laguugu sii haynayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' iyo in kale.

## Adigaaga la qabtay, la xiray ama ciqaabtiisa ku qaata xabsiga

Adigaaga la qabtay, la xiray ama ciqaabtiisa ku qaata xabsiga, daryeel waafaqsan LRV wuu noqon karaa mid markaas ku khuseeya, ka dib marka uu taqtar ku baaro oo uu u aragyo in ay shuruuduhu buuxsameen. Marka uu taqtarku ku baarayo waa inaad fursad u heshaa inaad sharaxdo dhibaatooyinkaaga. Waa inaad sidoo kale heshay macluumaad ku saabsan sababta aad ugu baahan tahay in laguu daryeelo si rabitaankaaga ka soo hor jeedda. Wuxuu taqtarku markaas ka dib qorayaa shahaaddo daryeel.

Inta aan lagu daryeelin waa inuu taqtar kale ku baaraa oo uu u arkaa in loo baahan yahay daryeelka waafaqsan LRV-gu.

## Goormuu dhammaanayaa daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'?

Haddii mid ka mid ah shuruudaha aysan sii shaqeyneynin waa la joojinayaa daryeelka.

Haddii aad tahay qof la hayo ama la xiray daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', wuxuu joogsanayaa ugu dambeyn marka xorriyaddaada laguu soo celiyo.

Ujeeddada daryeelk waafaqsan LRV-gu waa inaad noqoto sida ugu fiican ee suurta galka ah, si aad u hesho daryeelka aad u baahan tahay iyadoon khasab ahayn.

# Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad

Shaqaaluhu waa inay kuu siiyaan macluumaad si aad wax u fahmeyso, waana inay ka jawaabaan su'aalahaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad macluumaad ka hesho daryeelka aad hadda hesho iyo haddii ay jiraan wax qorsheysan oo mustaqbalka ah intaba.

Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida ay kuu saameyn karaan dawooyinku, daweynta iyo waxyaabaha kale ee aad la kulanto inta aad ku jirto waqtiga daryeelka.

## Waa inaad lahaataa qorshe daryeel

Shaqaalahu waa inay sida ugu dhakhsaha badan ee suurta galka ah wadajir kuula sameeyaan qorshe loogu talagalay daryeelkaaga, intii suurta gal ah. Waa inuu halkaas ku qornaadaa daryeelka aad u baahan tahay.

## Macluumaad ku saabsan daweynta iyo dawooyinka

Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona sida ay daweynaha kala duwan iyo dawooyinku kuu saameyn karaan adiga iyo jirkaaga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad ogaato haddii ay jiraan khataro la xiriira daweynta, haddii ay wax dhici karaan marka aad dawada qaadato intii waqti ah, iyo waxyeello dhenaceedyada ka imaan kara.

Waxaad xaq u leedahay inaad waxa weydiiso ilaa aad ka fahanto waxa ay sheegayaan shaqaaluhu.

## Waxaad akhrisan kartaa waxa ay shaqaaluhu qoraan

Waxaad xaq u leedahay inaad akhrisato qorshahaaga daryeelka. Haddii ay suurta gal tahay waa inay shaqaaluhu wadajir adiga kuula sameeyaan qorshaha daryeelka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad akhrisato feylkaaga caafimaadka. Haddii uu taqtarku u aragyo inaad ku xumaaneyso ama uu daryeelkaagu ku xumaanayo inaad akhrisato feylka caafimaadka waa laga qarin karaa markaas macluumaadka. Waxaad markaas xaq u leedahay inaad maxkamadda racfaanka racfaan uga qaadato go'aanka ku saabsan feylkaaga caafimaadka.

## Yaa heli kara macluumaad adiga ku saabsan?

Sida caadiga ah waa adiga cidda go'aamineysa cidda ka baxsan kooxda ku daryeeleysa ee heli doonta macluumaad ku saabsan daryeelkaaga. Waxay xitaa taasi khusaysaa macluumaadka la siinayo xigtadaada.

## Daryeelka waxaa xukuma sharciga sir-qarinta

Sir-qarintu waxay ka dhigantahay in shaqaaluhu aysan cidna uga warrami karin caafimaadkaaga ama waxyaabahaaga kale ee qof ahaaneed. Gudbinta macluumaadku waxay sidaas darteed dhici kartaa oo keliya marka la sameeyo baaritaan sir-qarin ka dib. Macluumaadka sidoo kale waxaa la gudbin karaa marka adiga oggolaasho lagaa helo ka dib.

Xaalado qaar waxaa jirta suurtagalnimo ama waajib ah in macluumaadka la gudbiyo. Sooshaalka iyo hey’adaha caafimaadku waxay mararka qaar is dhaafsan karaan macluumaad hawlahooda ku saabsan haddii taas loo baahdo si laguu siiyo daryeelka lagama maarmaanka ah, daweyn ama taageero kale.

Marka qofka la siinayo daryeelka furan ee dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', waxaa loo baahan yahay qorshe daryeel oo isku duwan. Waxay taasi ka dhigan tahay in macluumaad go’an oo kugu saabsan adiga loo baahan yahay in la is dhaafsado tusaale ahaan degmadaada ama laacibiinta kale ee kuu siin doona daryeel iyo taageero sii socda.

## Ilmaha xigtadaada ah

Haddii ay ilmo kuu yihiin xigto waxay shaqaaluhu si gaar ah u tixgelin doonaan baahida ay ilmuhu u qabaan macluumaad, talooyin iyo taageero. Waxaa sidoo kale la waafajin doonaa baahida iyo heerka bisseylka ilmaha ee gaarka ah.

## Waxaad xaq u leedahay qof taageero ah

- Qofka taageerada waxaa kuu dooraya guddiga bukaannada, wuxuuna ku siinayaa taageero inta laguu daryeelayo si waafaqsan LRV iyo hal bil oo soo socota.
- Qofka taageeradu wuxuu kaa caawinayaa waxyaabahaaga qof ahaaneed, wuu kula hadlayaa, wuxuuna kula qaadanayaa waqti

## Xeerarka dadka taageerada ah

Qofka taageerada kuu ah wuxuu kuu soo boqan karaa si joogto ah, laakiin mararka qaar saacadaha iyo jadwalka waaxda ayaa xukuma booqashooyinka. Marka laga soo tago booqashooyinka, wuxuu qofku kuu noqon karaa garab marka ay jiraan wadahadallada maxkamadda maamulka.

> Hawsha qofka taageeradu waa inuu adiga ku taageero.

Qofka taageerada ah waxaa saaran waajib sir qarin marka ay timaado caafimaadkaaga iyo macluumaadka kale ee shakhsi ahaaneed. Waxay taasi ka dhigan tahay inuu dad kale u sheegi karyo/inay dad kale u sheegi karto haddii ay jiraan xaalado gaar ah oo keliya.

## Sidan ayaad ku heli kartaa qof taageero ah

Shaqaalaha ayaa ku weyddiin doona haddii aad rabto qof taageero ah sida ugu dhakhsaha badan ee aad u dareento inaad ilaa heer fiicantahay oo aad fahmi karto macluumaadkaas. Waa guddiga bukaannada cidda kuu dooreysa qof taageero ah. Haddii aad

> Gobol kasta waxaa jooga guddi bukaan oo ay shaqadiisu tahay inay taageeraan oo ay caawiyaan bukaannada iyo xigtada si ay u helaan macluumaad, una gudbiyaan aragtidooda daryeelka caafimaadka.

rabto in lagaa beddelo qofka taageerada ah ama aad cabasho ka qabto, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha daryeelka ama guddiga bukaannada.

## Xuquuqda qaarkeed waa la xaddidi karaa

Marka laguugu daryeelayo goob xiran oo lagu daryeelo dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’, waa la xaddidi karaa xuquuqda qaarkeed.



## Telefoon, kombuyuutar iyo warqado

Inta badan xaqbaad u leedahay inaad xiriir la lahaato xigtadaada sida qoyska, asxaabta iyo dadka kale ee muhiimka ah. Sidaas darteed waxaad la xiriiri kartaa ciddi aad rabto inta lagu jiro waqtigga daryeelka.

Xaalado gaar ah awgood waa lagaa mamnuuci karaa inaad isticmaasho telefoon ama hab kale oo aad kula xiriirto cid ka baxsan waaxda. Waxay taasi shaqeyneysaa oo keliya haddii ay lagama marmaan tahay iyadoo la tixgelinayo daryeelka ama dib-u-soo-celinta caafimaadkaaga ama si looga hortago in qof kale uu dhaawac gaaro.

Waxaad mar walba xaq u leedahay inaad warqad u dirsato qareen, caawiye sharci ama hey'ad dowladeed oo aad warqado ka hesho iyadoon shaqaaluhu akhrin. Laakiinse shaqaaluhu waxay u baahan yihiin inay hubiyaan in boostada kuu socota aysan ku jirin khamri, daroogo ama wax kale oo ku dhaawici

kara adiga amaba nidaamka isbitaalka. Haddii ay shaqaaluhu helaan waxyaabo noocaas ah, way kaa qaadi karaan.

### Waax leh heerka amniga 1 ama 2

Haddii aad tahay qof la qabtay, la xiray ama laguugu xukumay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la', oo leh eegitaan gaar ah oo bixitaan oo aad ku jirto waax leh heerka amniga 1 ama 2 waxaad isticmaali kartaa oo keliya kombuyuutarka ama telefoonka ay waaxda daryeelku ku siiyaan. Inta waqtigaas lagu jiro shaqaalaha ayaa hayd doona kombuyuutarkaaga ama telefoonkaaga.

## Shaqaaluhu way baari karaan alaabtaada

Shaqaaluhu way baari karaan, haddii uu taqtarku u arko inay taasi lagama marmaan tahay, in aadan heysan waxyaabo aan laguu oggoleyn inaad heysato. Waxay waxaasi noqon karaan khamri, daroogo ama wax kale oo ku dhaawici kara adiga ama cid kale.

Marka wax la baarayo, waxay shaqaaluhu daba iyo dacal u baari karaan dharkaaga iyo boorsooyinkaaga. Waxay xitaa kaa codsan karaan inaad si ku meel gaar ah isaga bixiso dharkaaga si ay u eegaan inaadan heysan wax aan laguu oggoleyn inaad ku haysato waaxda. Hubinta waxaa la fulin doonaa iyadoo laydin ixtiraamayo adiga iyo jirkaaga.

## Booqasho

Inta lagu jiro waqtiga daryeelka xaqbaad u leedahay inaad la kulanto dadka muhiimka kuu ah. Dadka aad rabto inay ku soo booqdaan waxay imaan karaan waqtiga booqashada ee waaxda.

Xaalado gaar ah awgood waa la xaddidi karaa booqashooyinkaaga. Waxay taasi ku saleysnaan kartaa inay booqashooyinku kuu keenayaan inay xaaladdaadu sii xumaato.

## Hawlaha iyo joogitaanka dibadda

Meesha laguugu daryeelayo waxaa inta badan ka jirta fursad hawl-maalmeed iyo dibad joogid. Xaalado gaar ah awgood waa la xaddidi karaa xuquuqdan iyada ah. Waxay taasi ku saleysnaan kartaa inay hawluhu kuu keenayaan inay xaaladdaadu sii xumaato.

Si kastaba ha ahaatee, oggolaasho la’aan kama tegi kartid waaxda ama aagga isbitaalka, marka lagu siinayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’. Si aad taas u sameyso waa khasab inaad oggolaansho ka hesho taqtarka.

Haddii laguugu xukumay daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' oo leh eegitaan gaar ah oo bixitaan, waa maxkamadda cidda go'aamineysa haddii la kuu oggolaanayo in aad ka baxdo aagga isbitaalka (fasax). Maxkamaddu way u xilsaari kartaa madaxa taqtarka sare go'aaminta xaqa fasaxa.

## Waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybqaadato waxa

Daryeelka caafimaadka ee bukaanka waa in ilaa intii suurta gal ah, la qaabeeyaa, lana fuliyaa iyadoo lala tashanayo bukaanka. Waxay taasi ka dhigan tahay inaad heli doonto macluumaad ku aaddan qiimeynta iyo talooyinka taabanaya daryeelkaaga. Waa inaad sidoo kale ilaa intii suurta gal ah qeby ka noqotaa go'aamada ku saabsan daryeelkaaga. Waxaa isla mar ahaantaasna sidoo kale jira xaddidaado ku saabsan ka qaybgalka.

# Tallaabooyin khasab ah

## Xalka keliya ee ugu dambeeya

Daryeelka xiran ee dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’, wuxuu, xaalado gaar ah awgood, taqtarku go'aamin karaa dadaallo si toos ah uga soo horjeeda rabitaankaaga. Waxaa loogu yeeraa tallaabo khasab ah, waxaana la isticmaali karaa oo keliya marka ay dhammaan albaabbada kale isi soo xiraan.

> Haddii laguu geystay tallaab khasbid ah waa in lagu qoraa feylkaaga caafimaadka.

## Khasab ku siinta dawooyinka

Haddii aadan rabin inaad dawadaada qaadato, shaqaaluhu way ixtiraamayaan taas ilaa intii suurta gal ah. Haddii ay xaaladdaadu tahay mid aad u daran oo uu taqtar u aragyo in, si kastaba ha ahaatee, ay tahay inaad qaadato dawo go’an, waa la oggolyahay in khasab laguugu siiyo dawooyinka.

## In suun laguugu xiro

Wuxuu taqtarku go'aamin karaa in laguugu xiro suun, laakiin waa haddii ay jirto khatar weyn oo ah inaad is dhaawacdid adigu oo keliya ama cid kale dhaawacdid. Marnaba laguuguma xirxiri karo meel in ka badan inta aadka lagama maarmaanka u ah.

> Cidna kuugama hanjabi karto in meel laguugu xirxirayo ama gooni lagaaga soocayo dadka kale.

- Marka aad meel ku xirxirantahay waa in uu taqtar ku baaraa ugu yaraan afartii saacba hal mar.
- Ma jiryo xad u go’an inta go'aan ee meel ku xirxiridda ee uu taqtarku qaadan karo. Laakiin sida ugu dhakhsaha badan ee aysan usii jirin sabab aad meel ugu xirxirnaato ayaa loo joojinayaa tallaabooyinki la qaaday.
- Shaqaalaha daryeelka ayaa qolka kugula jiri doonaa waqtigaas oo dhan.

## Gooni u soocid – qol joogid

Taqtarku wuxuu go'aamin karaa in gooni laguu sooco, tusaale ahaan in lagu xiro ama lagaa hor istaago inaad qolka ka baxdo.

Gooni u sociddu waxay imaan kartaa oo keliya haddii aad leedahay dhaqan weerar ah ama arbushaad badan oo aad u adkeynaya in dadka kale la daryeelo.

- Waxaad gooni u soocnaan kartaa ugu badnaan siddeed saacadood. Haddii ay tahay inaad soocnaato muddo dheer waa inuu taqtari gaaraa go'aan cusub oo shaqeynaya ugu badnaan siddeed saacadood. Xaaladaha qaar way dhici kartaa inuu yimaado go'aan khuseeya waqti go’an oo ka badan siddeed saacadood.
- Ma jiryo xad u go’an inta go'aan ee uu taqtarku gaari karo, laakiin sida ugu dhakhsaha badan ee aadan u keeneyn inay aad u adkaato in la daryeelo dadka kale ayaa loo joojinayaa tallaabooyinki la qaaday.
- Shaqaalaha daryeelku way ku soo eegi doonaan markii muddo la joogaba.

## Wadahadal ka dambeeya tallaabada khasab ku daryeelidda

Haddii aad la kulantay tallaabo khasab ah waxaa sida ugu dhakhsaha badan ee ay xaaladdaadu u oggolaato laguugu casuumi doonaa wadahadal aad la yeelato shaqaale. Wadahadalku wuxuu noqon doonaa mid taageero kuu ah, wuxuuna kuu yahay fursad aad ku sharrixi karto wixii aad la kulantay. Wadahadalku wuxuu sidoo kale shaqaalaha u noqon karaa fursad ay si fiican ugu fahmaan sida ay kuu caawin karaan si aan mar kale loogu baahan in la isticmaalo tallaabo khasab ah.

# Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato

Haddii aad u aragto in go'aan laga gaaray daryeelkaagu uu khaldan yahay waxaad racfaan u qaadan kartaa maxkamadda maamulka. Laakiin go'aamada oo dhan lagama qaadan karo racfaan.

## Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona sida la sameeyo

Waa lagu ogeysiin doonaa go'aamada aad racfaanka ka qaadan karto. Waa laguu siin doonaa macluumaad ku saabsan sida aad sameyneyso iyo sida racfaanka loo qoro. Waxaad sidoo kale heli doontaa macluumaad ku saabsan xaqaaga ah inaad qabsato wakiil ama garyaqaan iyo xaqa aad mararka qaar u leedahay inaad hesho garyaqaan guud.

## Garyaqaan guud ayaa ku caawin kara

Marka aad go'aan uga dacwooto maxkamadda maamulka waxay maxkamaddu mararka qaar kuu doori kartaa garyaqaan guud. Laakiinse garyaqaan guud lama magacaabi doono, haddii la maleyn karo in aysan jirin baahi loo qabo garyaqaanka. Waa bilaash in caawimaad laga helo garyaqaan guud.

# Haddii aadan qanacsaneyn ama aad su'aalo qabtid

Waxaad mar walba la hadli kartaa shaqaalaha daryeelka ama taqtarkaaga. Way ku caawin doonaan, waxayna mas'uuliyad ka saarantay inaad hesho daryeel wanaagsan.

## Fadlan ila soo xiriir!

## Aragti iyo taageero

1177 ayaad ka akhriyi kartaa wax dheeri ah oo ku saabsan sida la sameyn karo si loo gudbiyo aragti ama looga cawdo daryeelka. Gal bogga 1177.se ee raadi "haddii aadan ku qanacsaneyn". Waxaad sidoo kale wax dheeri ah akhrisan kartaa adigoo bogga socialstyrelsen.se ka raadinaya "ku qanacsaneyn daryeelka".

1177 waxaa sidoo kale ku jira macluumaad ku saabsan ururrada bukaannada iyo kuwa xigtada ee taageerada bixiya. Waxaad halkaas kala xiriiri kartaa dad leh waaya-aragnimo taada la mid ah. Gal bogga 1177.se ee raadi "ururrada bukaannada iyo ururrada xigtada".

Haddii lagaa mamnuucay ama aad leedahay fursado xaddidan oo aad ku isticmaasho kombuyuutar waxaad shaqaalaha kala hadli kartaa waxa aadan ku qanacsaneyn daryeelkaaga. Waxaad xitaa weyddiisan kartaa shaqaalaha inay kaa caawiyaan inaad hesho macluumaad ku saabsan ururrada bukaannada iyo kuwa xigtada ee la shaqeeya bukaannada loo daryeelayo si waafaqsan LRV.

# Qaamuuska iyo soo gaabinta erayada

| | |
|---|---|
| **Taqtarka sare ee madaxda ah** | Taqtar takhasus u leh cudurrada maskaxda oo mas'uul ka ah daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’. |
| **Maxkamadda maamulka** | Maxkamadda gaari karta go'aanka khasab ku daryeelidda. |
| **Go'aanka xereynta** | Go'aanka daryeelka khasabka ah ee ay tahay in uu diyaar yahay inta aan si khasab ah laguu daryeelin. Taqtarka qoraya go'aanka xereyntu waa inuu ahaadaa mid takhasus u leh cudurrada maskaxda. . |
| **Qofka xiriirka ah** | Qof ka mid ah shaqaalaha oo leh mas'uuliyadda gaarka ah ee kula xiriiridda. |
| **LRV** | Xeerka daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’. |
| **Fasax** | Fursad uu qofku iskiis ugu joogi karo meel ka baxsan aagga isbitaalka, tusaale ahaan guriga. |
| **Daryeel xiran oo khasab ah** | Daryeelka khasabka ah ee isbitaalka oo habeen iyo maalinba ah. |

| | |
|---|---|
| **Shahaaddada daryeelka** | Shahaaddada taqtarka ee ugu horreysa ee loo baahan yahay si khasab laguugu daweeyo. Haddii ay jirto shahaaddo daryeel waxaa si rabitaankaaga ka soo horjeedda laguugu sii hayn karaa isbitaalka inta aan la go'aamin in si khasab ah laguu daryeelo. . |
| **Qorshaha daryeelka** | Dukumiinti sharraxa daweynta iyo waxyaabaha kale ee aad u baahan tahay inta lagu jiro waqtigga daryeelka. |
| **Daryeel furan oo khasab ah** | Laga yaabee in ay khasab tahay inaad qaadato dawo go'an ama ka qeybgasho daweyn, laakiin aadan u baahnaan inaad isbitaalka joogto habeen iyo maalinba.. |

# Tix-raacyada

Xeerarka khuseeya bukannada oo dhan waxay ku jiraan xeerka daryeelka caafimaadka bukaanka (HSL), xeerka bukaanka iyo xeerka amniga bukaanka (PSL).

Xeerarka gaarka ah ee daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' waxay ku jiraan Xeerka daryeelidda dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la' (LRV).

Xeerarka ku saabsan sir-qarintu waxay ku jiraan xeerka bannaanyaalnimada iyo sir-qarinta (OSL).

*Walxaha acluumaadka waxaa loo qaabeeyay si waafaqsan xeerarka iyo sharciyada kale ee khuseeya daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’. Si uu macluumaadku u noqdo mid si fudud loo fahmi karo waxaa dib loo qaabeeyay erayada iyo hababka wax loo yiraahdo ee la xiriira sharciyada qaarkood.*

Macluumaad kugu socda adigaaga loo fidinayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’

Macluumaad kugu socda adigaaga loo fidinayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’

Socialstyrelsen

Macluumaad kugu socda adigaaga loo fidinayo daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la’ - Daryeel waafaqsan LRV (nuqul nr: 2024-9-9203) waxaa laga soo degsan karaa barteenna intarnetka ama waxaa laga dalban karaa Adeegga Faafinta ee Guddiga Arrimaha Bulshada.
www.socialstyrelsen.se/publikationer